

Sida uugu wanaagsan ee looga badbaado Ciyaarta Qamaarka

1. Marka ugu horeysa go'aanso imisa lagac ayaad dooneysaa in aad ku qamaartid.
2. Ciyaar adigoo og in aad khasaareysid oo uu ku guleysigeedu yaryahay – sidaas darted marka hore ku tasho in aad ku qamaartid lacag aad bixin kartid
3. Waxaad gaartaa go'aan aad hubtid haddii aad qamaareysid –ogow nasiibkaada sida uu noqon karo.
4. Uga fakar in qamaariddu ay tahay nooc madadaalo ah –aysan ahayn waddoo lacag lagu helo.
5. Haddii aad si weyn ugu guleysatid ku farax! Bal haddana xusuusi naftaada in aysan markale dhici karin.
6. Ha qamaarin marka aad daalantahay, caajisantahay, anfariisantahay ama marka aad xanaaqsantahay .
7. Xisaabi oo meel ku qoro waqtiga kaaka luma qamaarka iyo inta lacag ee kaaga khasaartay .
8. Rumeysa ehelkaada iyo saaxibbadaada haddi ay walaac ka muujiyaan qamariddada, waxaa laga yaabaa in ay arkayaan waxaadan adiga u jeedin
9. Haddi aad qamaar ciyaareysid waxaad isticmaashaa lacagtaada oo kaliya. Lacag kale ha soo deynsan.
10. Waxaad ogaataa sida badan ee loo qamaaro ma xukumi kartid waxa soo bixi doona- Waa ciyaar nasiib ku xiran.
11. Haddii aad qamaareysid haki ciyaarahaada oo fasax qaado, soo war-wareeg, wax cun, ama dibbadda u bax si madaxaada uu u soo nasto.
12. Maskaxdaada fur marka aad qamarreysid, cabbiddada khamrigana xaddid.
13. Isku misaan qamaaridda iyo waxyaalaha kale ee lagu tamashleeyo
14. U raac qamaaridda qof kale ee aan qabin cudurka qamaaridda
15. Aad ha isu khasaarinin, hana doona jabkaada
16. Ha qaadanin Karedit caarkaada iyo buugga bangigaba marka aad qamaareysid.
17. Xaddid waqtiga aad qamaarka ciyaareysid
18. Adiga ka gaar go'aan qamaaridda – Ha ogolaanin in dad kuugu qasbaan.
19. Ha u isticmaalin qamaarka hab aad ilowdid dhibka iyo duruufaha adag
20. ka la hadal ruux aad ku kalsoontahay haddii aad ka shakisantahay qamaariddaada.